

Xeerka Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta lamba. 226 ee 20 Agoosto 1968

Qaab Dhismeedka Maxkamadda Gobolka Benaadir

WASIIRKA

Kadib markii la arkay qod. 83 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 ee Xeernidaminta dowladda iyo wax ka bedelkii sigay;

Kadib markii la arkay qod. 3 iyo 32 ee Xeer-sharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962;

Kadib la arkay shaxda “D” ee Xeerka Wasiireed lamba. 236 ee 28 Agoosto 1962;

Kadib markii la tixgeliyey baahida loo qabo in la ballariyo qaab-dhismaha Maxkamadda Gobolka Benaadir;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Golaha Sare ee Garsoorka;

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Tirada Guud ee Garsoorayaasha Maxkamadda Gobolka Banaadir waxaa laga qaaday 5 oo laga dhigay 7.

Qod. 2

Xeerkani waxay hirgelin doonta isla waqtigaan.

Muqdisho, 20 Agoosto 1968.

Wasiirka

Aden Shire Jama

Waa la arkay lana diiwan geliyey- diwaan lamba. 4 bogga lamba. 192

Muqdisho, 7 Setember 1968.

Xisaabiyaha Guud

Mohamud Isse Salwe